



# Macallin Wax Ka Dhiga Akadeemiyada ACCESS ayaa Ka Mid Noqanaya Koox Sahamiyaal ah oo Sahamin Doona Sagxadda Hoose ee Badweynta

Dr. Alfonso Garcia Arriola, waa barre wax ka dhiga Akadeemiyada ACCESS, wuxuuna qeyb ka noqon doonaa koox sahamiyaal ah oo khariirad u sameynaya sagxadda hoose ee badweynta iyada oo ay la jiraan sidoo kale koox sahamiyaal ah oo la jira Ocean Exploration Trust (OET). Macallinku wuxuu ku guuleysatay mid ka mid ah boosaska 12 ka ah ee lagu tartamayey iyaga oo ay soo codsadeen koox iskugu jirta macallimiin iyo xiriiriyaal.

Garcia Arriola wuxuu ka mid noqon doonaa kooxda raaci doontaa markabka magaciisa la yiraa E/V Nautilus, markabkani oo dhererkiisu dhan 64-mitir kaasi oo ah Markab loogu talogalay cilmi baarista, waqtigaasi uu la saaran yahay markabka waxay socdaal ku bixin doonaan Badweynta Baasifiga. Cilmi baarayaasha saaran markabku waxay isticmaali doonaa baabuurta iswada oo laga hoggaaminayo markabka gudihiisa, iyo qalab teknoolajiyadeed oo loogu talogalay in sagxadda hoose badda loogu sameeyo khariirad. Safarka sahaminta ah ee Garcia Arriola waxaa markiisii hore la qorsheeyey sanadkii 2020, laakiin waxaa dib loo dhigay ka dib markii uu dilaacay cudurka faafaya, haddaba socdaalkani wuxuu bilaabmi doonaa bishan Oktoobar 10keeda ilaa Oktoobar 24keeda.

Ocean Exploration Trust (OET), waa hay'ad macaash doon aan ahayn oo uu aasaasay Dr. Robert Ballard sanadkii 2008, iyada ku shaqeysa marka la yiraa E/V Nautilus taasi oo hadafkeeduna yahay sidii loo sahamin lahaa badweynta, iyada oo la raadinayo macluumaad cusub oo ku saabsan cilmiga barashada dhulka, bayoolajiga, taariikhda badda, cilmiga aataarta qadiimka ah, fisigiska, iyo kimistariga iyada oo hore loo marinayo waxbarashada STEAM iyo soo saarista teknoolajiyad caalamka ku cusub.

“Waxaan aad ugu faraxsanahay inaad ka qeybqaato safarkan sahaminta ah, oo aan la kaashanayo saynisyahano kale sidii aan ardaydeyda iyo bulshada iskuulka ugu keeni lahaa faham ballaaran oo ku saabsan sayniska bee’adda iyo sahanka badweynta dunida ee xiisa leh,” ayuu yiri Garcia Arriola, oo barre ah maadadda sayniska u dhiga fasalada 7aad iyo 8aad ee Akadeemiyada ACCESS.

Horumarka uu sameynayo sahanka markabka iyo saynisyanada waxaad kala socon kartaa si toosa shabakada [Nautilus Live website](#) iyo hay'adaha ee kanaalada [Twitter](#), [Facebook](#), [Instagram](#) iyo [YouTube](#).